-INTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 2 aad Garoowe, 29 September 2000 Lam. 9

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar waiba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa.dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo; Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

### Sharci


- **Sharci Lam.** 12 ee 27/09/2000. (Garoowe) kuna saabsan Qaanuunka Isgaarsiinta Dawladda Puntland.......................................................... Bogga. 80 – 83
- **Sharci Lam.** 13 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsab Qaanuunka Madbacada iyo Qoraalada .......................................................... Bogga . 84 – 88
- **Sharci Lam.** 14 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsan khidmada laga qaadayo shatiyada wax lagu dhoofiyo, lagu soo dejiyo iyo ganacsiga guud................Bogga. 89 –92.
- **Sharci lam.** 15 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsan hanti dhowrka Guud .......... ..........................................................Bogga 93 – 98.
- **Sharci Lam.** 16 ee 27/09/2000. (Garoowe) kuna saabsan Qaanuunka dhul Bixinta........ ..........................................................Bogga. 99 -105


### Qaybta Labaad

### Xeer

Waxba Maleh

### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

*OFFICE OF THE PRESIDENT*

Sharci Lam 15 ee 27/09/2000
kuna saabsan Hanti Dhawrka Guud,

Garoowe 29 September

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland,

**MARKUU TIXGELIYEY** Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda summaddeedu tahay GW/75/2000, taariikhdeeduna tahay Garoowe 04/09/2000,

**WUXUU SOO SAARAY: -**

Sharcigan soo socda:

**Qodobka 1aad**

Sharciga Hanti Dhawrka Guud ee Dawladda Puntland ee sharcigan ku lifaaqan waa la ansixiyey

**Qodobka 2aad**

Saddex nuqul oo sharcigan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada hal nuqul, Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul.

**Qodobka 3aad**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna sharcigani ka mid noqonayaa sharciyada dalka, qofkastana waxaa ku waajib ah in uu dhawro kuna dhaqmo.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

*SHARCI LR*__________

## *KU SAABSAN HANTIDHAWRKA GUUD*

*QODOBKA 1AAD.*
*HAY'ADDA HANTIDHAWRKA GUUD.*

*Hantidhawrka Guud ee DGP, waa Hay'ad u madaxbannaan gudashada waajibaadka iyo howlaha uu u xilsaaran yahay, sida ku cad Qodobka 17aad ee Axdiga DGP.*
*Hay'adda Hantidhawrka Guud, waa hay'adda u sarreysa ee leh awoodda Hantidhawrnimo ee DGP.*

*QODOBKA 2AAD*
*HANTIDHAWRAHA GUUD*

*Hantidhawraha Guud ee DGP waxaa magacaabaya Madaxweynaha DGP, sida uu dhigayo Qodobka 17aad ee Axdiga Dawlad-goboleedka Puntland, waxaana ansaxinaya Golaha Wakiillada.*
*Hantidhawruhu wuxuu awood buuxda u leeyahay dhammaan gudashada xilka dawladeed ee uu hayo.*

*QODOBKA 3AAD*
*KU-XIGEENKA HANTIDHAWRAHA GUUD*

*Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud waxaa magacaabaya Madaxweynaha DGP, magacaabidaas oo waafaqsan xeerka & Sharciyada Shaqaalaha Dawladda.*
*Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud wuxuu fulinayaa Hawlaha Hantidhawraha Guud uu u wakiisho.*

*Hantidhawraha Guud marka uu shaqada ka maqan yahay, ama ay ku timaado xaalad uu xilka u gudan kari waayo, waxaa xilka Hantidhawraha Guud fulinaya ku-xigeenkiisa, haddii ay ku xigeennadu mid ka badan yihiin, waxaa xilka Hantidhawraha fulinaya Ku-xigeenka 1aad.*

*QODOBKA 4AAD*
*AGAASIMEYAASHA WAAXYAHA (DIRECTORS)*

*Agaasimeyaasha Waaxyaha (Directors) soo jeedinta magacaabidooda waxaa leh Hantidhawraha Guud, isaga oo u gudbinaya Madaxweynaha DGP, si uu u ogolaado.*

*QODOBKA 5AAD.*
*SHAQAALAHA HANTIDHAWRKA GUUD.*

a) *shaqaaleynta shaqaalaha Hay'adda Hantidhawrka Guud, waxay waafaqasanaanayaan sharciyada iyo xeerarka shaqaalaha DGP.*
b) *Hantidhawrka Guud wuxuu kasoo ergisan karaa Hay'adaha Dawladda ama Ciidanka Booliska, Howl-wadeenno ka qeyb qaata howlaha baarista ee Hay'adda Hantidhawrka Guud.*

<u>*QODOBKA 13AAD.*</u>
<u>*BAARISTA KHARASHKA.*</u>

*Hantidhawrka Guud wuxuu sameynayaa baarista kharashka, isaga oo sugaya, xaqiijinayana:*

*a) in kharashku ku baxay hawshii loogu talo galay, loona bixiyey si waafaqsan xeerarka xisaabaadka dawladda (according to accounting regulations).*

*b) In kahrashku waafaqsan yahay ku talo galka miisaaniyadda, kuna baxay qorshihii loo dejiyey.*

<u>*QODOBKA 14AAD.*</u>
<u>*BAARISTA DEEQAHA, ADEEGYADA IYO MASHAARIICDA HORUMARINTA EE HAY'ADAHA CAALAMIGA AH & NGOyada.*</u>

*Dhammaan deeqaha, adeegyada iyo mashaariicda horumarineed ee Hay'adaha caalamiga ah & NGOyadu ugu deeqaan dadweynaha DGP, Hantidhawrka Guud wuxuu ku yeelanayaa la socodsiin, hubin iyo xaqiijinta fulitaanka qorshihii ku talo galku ahaa.*

<u>*QODOBKA 15AAD.*</u>
<u>*BAARISTA HANTIDA*</u>

*Hantidhawrka Guud wuxuu baarayaa, hubinayaa hantida guurtada ah, hantida maguurtada ah ee Dawladda, hantida Hay'adaha dawladdu qeyb ku leedahay iyo kuwa kale ee sharcigu u jideeyey.*

<u>*QODOBKA 16AAD.*</u>
<u>*BAARISTA XISAABAADKA.*</u>

*Hantidhawrka Guud wuxuu u xilsaaran yahay baarista Dakhliga & kharashka DGP, wuxuuna kula xisaabtamayaa, kuna ilaalinyaa qof kasta oo mas'uul ka ah ama gacanta ku haya iyo qof kasta (Muwaadin ama Ajnabi) oo lug ama raad ku yeesha dakhli ama kharash ka mid ah hantida ummadda.*

<u>*QODOBKA 17AAD.*</u>
<u>*BAARISTA XISAAB-XIRKA SANNADKA.*</u>

*Hantidhawrka Guud wuxuu baarayaa xisaab-xirka sannadka ee uu soo gudbiyo wasiirka Maaliyadda, sida uu farayo qodobka 26aad ee sharciga maamulka xisaabaadka dawladdu. Sidoo kale Hantidhawrku wuxuu baarayaa xisaab-xirka sannadka ee Hay'adaha kale ee sharcigu u siinayo awoodda baarista.*

*Wasiirka Maaliyadda iyo Hay'adaha kale ee dawlad-goboleedka Puntland, haddii ay xisaab-xirka sannadka ugu gudbin waayaan Hantidhawrka Guud waqtiga iyo habka ku tilmaaman qodobka 26aad ee sharciga Maamulka xisaabaadka dawladda, Hantidhawraha Guud wuxuu warbixin u gudbinayaa Madaxweynaha & Golaha Wakiillada.*

<u>*QODOBKA 18AAD.*</u>
<u>*WARBIXIN-SANNADEEDKA BAARISTA XISAAB-XIRKA.*</u>

*Hantidhawrka Guud marka uu baarayo xisaab-xirka sannadka ee Wasiirka Maaliyadda iyo Hay'adaha kale, Hantidhawraha Guud wuxuu diyaarinayaa warbixin sannadeedka Hantidhawrka Guud, warbixintaas oo ay la socdaan nuqulladii caddeynta Hantidhawraha Guud ee sugnaanta xisaabaadka, wuxuuna u gudbinayaa, Madaxweynaha, Golaha Wasiirrada iyo Golaha Wakiillada DGP, ugu damabayn 30ka Bisha Juun ee sannad kasta.*

2

*OODOBKA 6AAD.*
*QALINKA IYO KHADKA DOOGGA AH*

*Isticmaalka qalinka iyo khadka doogga ahi waxay u gaar yihiin hay'adda Hantidhawrka Guud. Mas'uuliyiinta xisaabaadka ee Hay'adaha kale ee Dawladda waxaa ka reebban isticmaalka qalinka iyo khadka doogga ah.*

*OODOBKA 7AAD.*
*BAARISTA XISAABAADKA.*

*Hantidhawraha Guud iyo shaqaalaha Hantidhawrka Guud waxay awood u leeyihiin baaritaanka Maamulka lacagta, xisaabaadka iyo hantida Hay'adaha kala ah:*

*a) Hay'adaha dastuuriga ah, iyadoo la raacayo sharciga iyo xeerka loo dejiyey maamulka lacagta iyo xisaabaadka Hay'adahaas.*
*b) Maamulka dhexe (DGP), D/Hoose, Sharikadaha iyo Hay'adaha Dawladdu leedahay ama saami ku leedahay.*

*OODOBKA 8AAD.*
*AWOODDA HANTIDHAWRKA GUUD.*

*Hantidhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu waqti kasta uu u gudbin karo Madaxweynaha DGP warbixin la xiriirta hawlaha uu u xilsaaran yahay. Wuxuu kaloo warbixin iyo xisaab-xir sannadeedka u gudbin karaa Golaha Wakiillada Puntland.*

*OODOBKA 9AAD.*
*DHAWRSANAAN.*

*Hantidhawraha Guud, ku-xigeenkiisa, Agaasimeyaasha iyo shaqaalaha Hantidhawrka Guud, markey gudanayaan waajibaadka shaqo ee sharcigu u jideeyey, lama fara gelin karo, lamana hakin karo shaqadooda, lamana xiri karo inta ay shaqada hayaan.*

*OODOBK 10AAD.*
*DIIWAANGELINTA DUKUMENTIGA LACAG QABASHADA.*

*Hantidhawrku wuxuu diiwaangelinayaa dhammaan dukumentiga lacag qabashada ee DGP, Dawladaha Hoose iyo dukumenti kasta ee dakhli dawladeed lagu qabanayo.*

*OODOBKA 11AAD.*
*DIIWAANGELINTA (EXPENDITURE WARRANTY), QANDARAASYADA & HESHIISYADA*

*Hantidhawrka Guud wuxuu u xilsaaran yahay baarista hore ee kharashka (controllo preventivo) isaga oo inta aan kharashku bixin hubinya sugayana in kharashku waafaqsan yahay (expenditure warranty). sharciyada iyo xeerarka xisaabaadka dawladda. Hatidhawrku wuxuu diiwaangelinyaa qandaraasyada iyo heshiisyada waafaqsan nidaamka Maaliyadda iyo xisaabaadka DGP.*
*waxaa reebban in la dhaqan geliyo (Expenditure Warranty) iyo qandaraas aan ka diiwaan gashanayn Hantidhawrka Guud.*

*OODOBKA 12AAD.*
*BAARISTA DAKHLIGA.*

*Hantidhawrka Guud wuxuu baarayaa dakhliga soo gala Hay'adaha dawladda, wuxuuna hubinayaa in dakhliga loo qabtay, loo xereeyey, loona dhawray sida uu farayo sharciga, xeerka iyo awaamiirta u degsan dakhliga dawladda.*

*QODOBKA 19AAD.*
*BAARISTA XISAABAADKA.*

*Hantidhawraha Guud wuxuu baarayaa xisaabaadka uu usoo gudbiyo Xisaabiyaha Guud ee Dawladdu, iyada oo Xisaabiyaha Guud soo raacinayo xisaabaadka, warbixintiisa, faah-faahin iyo Arar guud.*
*Hantidhawraha Guud wuu ansixinayaa haddii uu ku qanco, haddii khaladaad ka muuqdo xisaabaadka Xisaabiyaha Guud, waxaa wax laga weydiinayaa Xisaabiyaha Guud, haddii jawaabaha iyo caddeymaha Xisaabiyaha Guud qancin waayaan. Hantidhawraha Guud, wuxuu dacwad (Eedeyn) ah u gudbinayaa Maxkamadda sare ee DGP, si Maxkamaddu go'aan uga gaarto, khaladaadka baarista xisaabaudka ka soo if-baxay.*

*QODOBKA 20AAD.*
*TALO BIXIN.*

*Hanatidhawrka Guud oo xilkiisu yahay toosinta Maamulka, wuxuu Hantidhawraha Guud talo bixin u gudbin karaa hay'adaha, kuwaas oo iyana talo bixin soo weydiisan kara Hantidhawrka Guud.*

*QODOBKA 21AAD.*
*MAAMUL XUMADA & GEFAFKA XISAABAADKA.*

*Hantidhawraha Guud wuxuu warbixin iyo talo bixin u gudbinayaa Hay'adaha ay baareen xisaabaadkooda, si maamul xumada iyo Gefafka xisaabaadka ka jira loo saxo (Dakhli, Kharash, Bakhaar, xisaabaad iwm).*
*Hay'aduhu way ku khasban yihiin in ay qaataan tala soo jeedinta Hantidhawrka Guud.*

*QODOBKA 22AAD.*
*EEDEYNTA & GUDBINTA EEDDA.*

*Baarista Hantidhawrka Guud sameeyo haddii ay kasoo if-baxaan dembi ciqaabeed, waxaa Hantidhawraha Guud ka diyaarinayaa gal-dacwadeed, waxaana eedeynta loo gudbinayaa Xeer-Ilaaliyaha Guud si uu ugu oogo dacwadda si waafaqsan xeerka habka ciqaabta dawladda.*

*QODOBKA 23AAD.*
*FULINTA DACWADAHA HANTIDHAWRKA GUUD SOO OOGO.*

*Dacwadaha Hantidhawrku soo oogo ee ku tilmaaman qodobka 22aad ee sharcigan lama joojin karo. Gal- dacwadeedka Hantidhawrka waxaa loo gudbinayaa Xeer-Ilaaliyaha Dacwaddu khuseyso, haddii uu Xeer-Ilaaliyuhu u arko in dembigu cad yahay, wuxuu dacwadda eedeysanaha horgeynayaa Maxkamadda awoodda u leh dembigaas.*

*Haddii uu Xeer-Ilaaliyaha Guud u arko in eeddo aanay dhammaystirnayn, wuxuu qoraal u gudbinayaa Hantidhawrka Guud, isaga oo qeexaya waxyaalaha ka dhiman eedda si Hantidhawrku u soo dhammaystiro eedeynta, marka uu Hantidhawrku soo dhammaystirana waxaa Xeer-Ilaaliyuhu eedeysanaha hor geynayaa Maxkamadda qaadista dacwaddaas awoodda u leh.*

*OODOBK 24AAD.*
*AWOODDA HANTIDHAWRKA GUUD.*

*Hantidhawraha Guud, ku-xigeenka Hantidhawraha Guud, Agaasimeyaasha iyo shaqaalaha Hantidhawrka Guud, marka ay fulinayaan waajibaadka hawleed ee sharcigu farayo ama siinayo, waxay si toos ah oo cad u leeyihiin awoodaha hoos ku qeexan ee ah:*

1. *in ay baaraan, kuna ilaaliyaan qof kasta oo (maamul lacageed, Xisaabeed, dakhli, kharash, lacag caddaan ah, buugaag lacag qabasho, tigidho, Bakhaarro iwm) mas'uul ka ah ama raad ku yeesha. Haddii ay kasoo baxaan fal-dembiyeedna, waxaa loo gudbinayaa eedeyntooda Maxkamadaha awoodda u leh. Haddii maamul xumo kasoo baxdana, waxaa laga qaadayaa tallaabo anshax-marin oo loo gudbinayo Hay'adda.*
2. *in ay u yeeraan, weydiiyaanna qof kasta oo laga xaqiijinayo arrimaha la xiriira baaristooda waqti kasta iyo meel kasta. Qofkii leh dhawrsanaan sharci, waxay ula xiriirayaan sida uu farayo sharciga dhawrsanaantu.*
3. *Waxay baari karaan, baaris awgeedna u qaadan karaan dukumenti-xisaabeed iyo Maaliyadeed kasta (dakhli ama kharash) oo ay u baahdaan, iyagoo qoraal caddeynta qaadashada dukumentigaas u reebaya Hay'addaas ama qofkaas.*
4. *Iyagoo gudanaya waajibaadkooda, haddii ay u baahdaan waxay dalban karaan Ciidanka Booliska.*

*OODOBKA 25AAD.*
*AWOODDA WARQADDA (SEAL)*

*Hantidhawrku wuxuu awood u leeyahay inuu ku xiro warqadda cad oo ah (Seal) xafiisyada dawladda, goobaha Hanti dawladeed taal, ama meel kasta oo tuhun ka galo marka ay baarista ku jiraan.*

*OODOBKA 26AAD.*
*KU XADGUDUBKA WARQADDA (SEAL)*

*cid kasta oo jarta, goysa, ama ku xadgudubta warqadda (SEAL) ee Hantidhawrku ku dhejiyo xafiis, khasnad, Bakhaar iwm ee lagu maamulo Hanti dawladeed, wuxuu muteysanayaa ciqaab, isagoo Maxkamadda loo gudbinayo.*

*OODOBKA 27AAD.*
*BURIN.*

*Waxaa la buriyey sharci & xeer kasta oo aan la socon karin ama kasoo horjeeda sharcigan.*

*OODOBKA 28AAD.*
*DHAQAN-GALKA.*

*Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ogolaadaan, uuna saxiixo Madaxweynaha DGP, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.*

*Md. Cabdullaahi Yuusuf Axmed.*
*Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland.*